# Lammaanaha iyo Ubadka

Lammaanaha
Xuquuqda iyo Waajibaadka Waalidka
Waalidnimada
Xanaanada Caruurta
Soo raridda Reerka
Khilaafyada

# Lammaanaha

Qaabab kale duwan oo ay iskula noolaan karaan dadka ayaa Jiro Swiiserlaan. Hadii aad doonaysid inaad guursato waa inaad ka wayn tahay 18 sano jir. Lamaanaha isqabo waxay leeyihiin xaquuqo isku mid ah.

## Wada noolaanshaha

Wadanka Swiiserlaan Qarniyadii ugu dambeeyay is badalo badan ayaa ka dhacay. Badanaa waxaa isla dagan Lammaanyaal aanan is qabin oo loo yaqaan (Saaxiibtinimo, Konkubinat). Lammaanayaashan waxaa u joogo Ubad. Dhexdooda kama jirto mas'uuliyad qaybsi. Taas micnaheedu waxay tahay, Ragga iyo Dumarka xiriirkan leh inaysan qasab ahayn midba howl gooni ah inuu qabto.
Sidoo kale Lammaanayaasha isku Jinsiga ah way wada noolaan karaan, Tusaale ahaan, Labo nin ama Labo naag. Waxay leeyihiin xuquuqo lamid ah lammaanayaasha kale aan isku jinsiga ahayn, wayna is guursan karaan.

## Guurka

Wadanka Swiiserlaan waxaad guursan kartaa marka aad gaarto da'da 18 Jirka. Sidoo kale dadka isku Jinsiga ah way is guursan karaan: Nin iyo Nin way is guursan karaan, sidoo kale Naag iyo naag way is guursan karaan. Hadii aad aad rabto inaad guursado, waa inaad iska diiwaangelisaa Xafiiska arimaha guurka (Zivilstandsamt) ee Basel-Stadt. Kaddib Xafiiska waxuu furayaa galka diyaarinta guurka "Ehevorbereitungsverfahren". Galkaan waxaa lagu diyaarinayaa Guurka. Xafiiska waxuu hubinayaa tusaale ahaan in labada qof is guursan karaan iyo inkale. Marka uu soo dhamaado galka kadib, waa inaad 3 bilood gudahood isku aqal gashaan. Xafiiska waxuu kula wadaagi doonaa warqadaha lagaa doonayo iyo qaabka ay tahay inuu u dhaco arooska.
Midka mid ah hadii uu meel dibadda ka ah Swiiserlaan ku noolyahay, midka halkan joogo ayaa dirsan karo codsiga Diyaar garowga Guurka kaasoo ah in Lammaanaha ka maqan loo ogolaado inuu yimaado Swiseerlan Kadibna guurku ka dhaco Halkan. Waxaa laga yaabaa in Xafiiska Arrimaha Guurka uu galo shaki ah in guurkiina uu yahay gaabsi (Scheinehe). Guurka Gaabsiga ah micnahiisa waa: Waxaad u guursanaysaa qofkaas dibadda ku nool kaliya siduu Swiiserlaan cagaha usoo dhigi lahaa ee ugu noolaan lahaa. Sidaas hadii ay dhacdo Xafiiska Arrimaha guurka waxuu kugu soo celin karaa codsigaaga. Hadii guurkiina horay u dhacay lagana shakiyo, guurkaas waxba kama jiraan ayaa laga soo qaadi karaa. Guurkiina Sidaas ayuu ku baabi'i karaa waliba waxaa laga yaabaa inaad sidaas ku wayso sharcigaagii Dalka aad ku joogtay.

## Xuquuqda iyo Waajibaadka

Lammaanaha is qabo waxay leeyihiin xuquuqo iyo waajibaadyo isku mid ah, sidaas ayaana ku qoran Qaanuunka. Labada is qabto waa dad siman. Si xorriyad ah oo aan qasab ahayn waa in ay isku guursadaan. Guurka qasabka ah (Zwangsheirat) waa midka qof lagu qasbo inuu guursado qofkale. Hadii Dowladdu ay arrinkaasi ogaato, guurkaasi waxaa laga soo qaadi doonaa waxba kama jiraan. Dadkii isku qasbay labadaas qofna waxay muteeysan doonaan ganaax.
Guur in lagugu qasbi rabo miyaa dareemaysaa? Xafiiska Talobixinta zwangsheirat.ch ayaad ka helaysaa caawinaad. Wicitaanka Taleefonka waa bilaash. Lambarka Taleefankana waa: 0800 800 007

## Qorshaynta Qoyska

Ma qabtaa su'aalo ku saabsan, Qorshaynta Qoyska, Uurka iyo Galmada? Gobolka Basel-Stadt waxaa ka dhisan xarumo Talooyin kaasiinayo arrimahaas. Mowduucyo badan oo kala duwan ayay kaala talin doonaan, Tusaale ahaan sida uurka looga hortago, dhibaatooyinka Galmada, Xanuunada Caafimaad ee Galmada, Xanuunada xubnaha Taranka ama Hadii adigoo ku talagalin aad uur qaado. Way kula talinayaan sidoo kale hadii aad uur leedahay ama Ubad kuu joogaan.

## Furiinka

Madoonaysaa Furiin? Waxaad codsi u dirsan kartaa maxkamadda Basel-Stadt ee (Zivilgericht). Kaligaa ayaa codsiga furitaanka gudbisan karo ama si wadajir ah adiga iyo lammaanahaaga.
Meel kabaxsan Swiiserlaan miyaad isku guursateen? Dibadda adinkoo isku guursaday xataa waxaad isku furi kartaan xeerarka Swiiserlaan u dagsan. Laakin waa inaad ugu yaraan hal sano deganeydeen Swiiserlaan. Waana in Swiserlaan tahay meesha kaliya ee deegaan aad ku tihiin. Kala taggiina kadib is badal ayaa ku imaan karo sharciyada dalka aad ku joogtaan. Laga yaabee in Swiiserlaan aad kusii noolaato laguu ogolaanin.
Codsiga qaadashada Dhalashada Swiiserlaan miyaa kuu xareysan? Waxaa dhici karayso sidoo kale furitaanka kadib in lagugu soo celiyo codsigaaga oo laguu diido qaadashada Dhalashada.
Furitaanka kadib, Malaguu ogolyahay inaad sii Joogto Swiiserlaan? Waxaa habboon oo ugu fiican jawaabtaas inaad waydiiso Xarumaha latalinta lammaanaha iyo Qoysaska ama Xafiisyada Garyaqaannada. Haddii aad tahay qof la dhibban rabshadaha Qoyska, waxaa jiro xeerar u gaar ah.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/partnerschaft-und-kinder/partnerschaft

# Xuquuqda iyo Waajibaadka Waalidka

Marka Ubad kuu dhasho, waa inaad sida ugu dhaqsaha badan ula socodsiisaa Xafiiska Arimaha Bulshada (Zivilstandsamt). Haddii aad tahiin dad is qaba, xaqa barbaarinta Ubadkiina si toos ah ayaad uwada gudanaysaan. Haddii aadan is qabin, waad isu daysan kartaan qofkii Masuuliyadaas qaadi lahaa.

## Diiwaangelinta ilmaha dhashay

Marwaliba oo ay Caruur kuu dhalato waa in aad lasocodsiisaa Xafiiska qaabilsan Arrimaha Bulshada (Zivilstandsamt). FIIRO GAAR AH: Waa inaad aado Xafiiska Zivilstandsamtiga ku yaalo xaafadda uu ku dhashay Ubadkaada. Waxaana lagayaaba inaad kuqasbanaanin inaad aado Xafiiska guud ee laga xukumo degmada.
Ubadkaada Haddii uu ku dhashay isbitaal:
Isbitaalka ayaa warqada dhalashada usii diraayo Xafiiska Arimaha Bulshada (Zivilstandsamt). Sidaas ayuu kaaga dhacay waajibkii ahaa lasocodsiinta Ubadka kuu dhashay.
Ubadkada haddii uu Isbitaal ku dhalanin:
Waxaa laga yaabaa meel aan hoyga caafimaadka ahayn, sida gurigaada ama meel kale inuu ku dhashay ilmahaaga. Xaalada marka noocan oo kale ay tahay, waajibka ah;
Wargelinta Xafiiska Zivilstandamtiga ee ubadka dhashay adiga ayuu ku saaranyahay.
Waxaad haysataa muddo 3 Maalin ah oo aad kula socodsiiso Xafiiska. Xafiiska Arrimaha Bulshada ayaa ku sheegi doono, waxii warqado ah ee lagaaga baahanyahay.
Fiiro Gaar ah:
Ubadka ku dhashay Swiiseerlaan, si toos ah uma noqonayaan Swiis. Isla markaasna ma heli doonaan dhalashada ama basaboorka wadanka.

## Aqoonsi Aabaha

Adinkoo Xaas ah hadduu Ubad idiin dhasho:
Odayga reerka sitoos ah ayaa loo diiwaan galinayaa inuu yahay Aabaha ilmaha dhashay. Waxaa macquul in Odayga reerka aaminsanyahay inuusan ahayn Aabaha Ubadkaas. Maxkamadda ayuu horteeda kaga doodi karaa inuusan Aabo u ahayn Ilmahaas.
Adinkoo is qabin Hadduu Ubad idiin dhasho:
Aabaha Ubadkaas si toos ah looma diiwaan gelin doono inuu yahay ilmaha Aabahood. Inta Ubadku ifka imaan kahor ama kadib ayuu Aabaha tagi karaa Xafiiska Arrimaha Bulshada (Zivilstandsamt) si aqoonsi ugu raadsado inuu yahay Aabaha ilmahan dhashay ama dhalan doono. Waxaa laga yaabaa Aabaha inuusan rabin inuu qirto inuu aabaha ilmahaasi yahay. Hadii ay dhacdo sidaasi Hooyada Ubadkaas ayaa maxkamada tagi karto si ay uga dalbato inuu Qirto isaga inuu dhalay ilmahaas.

## Daryeelka Ubadka

Ka waalid ahaan waa inaad xoogga saartaan Badqabka Carruurtiina. Taasi waa Xaqa iyo Xuquuqda ilmahu leeyihiin (elterliche Sorge). Tusaale ahaan, waa inaad barbaarisaan ubadkiina noloshoodana aad kafaalo qaadaan. Sidoo kale waa in sharci ahaan inta ay ka gaarayaan 18 sano jir adinka mas'uuliyadooda haysaan.
Hadii aad tihiin lammaane is qaba:
Labadiinaba ayaa si iskumid ah u qaadaya Gudashada Xaqa iyo Xuquuda Ubadkiina.
Hadii aadan is qabin:
Ugu horayn aabuhu waa inuu aqoonsiga Aabe ahaanshaha raadsado. Kadib ayaad labadiinaba si xor ah qoraal ku cadayn kartaan inaad si wada jir ah ugudanaysaan waajibka daryeelka Caruurtiina (gemeinsame elterliche Sorge). Tani waxaad samayn kartaan marka Xafiiska (Zivilstandsamt) aabaha u aqoonsado inuu yahay qofka dhalay ilmaha. Sidoo kale waxaad aadi kartaan Hay'adda Daryeelka Ubadda ee Gobolka (Kindesschutzbehörde, ee loosoo gaabiyo KESB).
Hadii aad isku waafaqi waysaan ciddii daryeeli lahayd ubadka, waxaa go'aan ka gaari doono Hay'adda daryeesha Dhallaanka. Hadii aad qabto waydiimo ama aad u baahantahay caawin, waxaad aadi kartaa Xarumaha talobixinta Qoyska.

## Lacagaha Daryeelka Ubadka

Haddii aad kala tagtaan adiga iyo lammaanahaaga, daryeelidda ubadkiina waa inaad sii wadaan. Waa inaad hadaba isla eegtaan cidii la wareegi lahayd nafaqaynta caruurtaas iyo qofba inta qarash ah ee kusoo aadayso inuu siiyo caruurtiisa (Unterhalt). Labadiinaba waad bixinaysaan lacagaha daryeelka caruurtiina. Waxaa macquul ah in hooyada iyo aabaha lacag isku mid ah bixinin. Sidoo kale waxaa macquul ah midka mid ah waalidka inuusanba waxba bixinin. Tani waxay ku xirantahay lacagta kusoo gasho ama aad ku shaqayso inta ay dhantahay amaba inta waqti aad ku bixiso daryeelka ubadkaada. Midaan haddii aad ku heshiin waysaan waxaad isla aadi kartaan Maxkamad.
Aabaha ama hooyada haddii uu mid lacagihii bixin waayo:
Midkiin hadii uu lacagtii bixin kari waayo, waxaad caawimaad ka dalban kartaan Xafiiska laga xukumo xaafadiina (Wohngemeinde). Xafiiskaan waxuu idinka caawin doonaa inaad lacagahii aad heshaan. Waxaa macquul ah in la idin siiyo lacagaha daryeelka bulshada loogu talagalay ee la siiyo haddii hal waalid uu lacagihii kusoo aaday bixin kari waayo. Waxaa loo yaqaanaa kharashaadkan (Alimentenbevorschussung)

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/partnerschaft-und-kinder/rechte-und-pflichten-der-eltern

# Waalidnimada

Ma ahan mid fudud in caruur la koriyo. Waxaa macquul ah, marmar inaad is weydiiso waxa u fiican Ilmahaaga. Waalidiin kale inaad waydiiso ayaa aad kuu caawin karta. Sidoo kale waxaa jiro Xarumo kala duwan oo ku caawin kara.

## Bar kulanka

Hooyooyinka iyo Aabeyaasha Barnaamijyo badan oo loogu talagalay ayaa jiro. Halkan hoose waxaad kaheli kartaa meelaha aad kula kulmi karto waalidiin kale ama aad kula qaadan karto waqti ilmahaada.

- Naadiyada Dhallaanka (Krabbelgruppen) waxaa loogu tala galay ilmaha 2 sano kayar. Naadiyadan waxaad isku baran kartaan waalidiin kale.
- Baashaalka Waalidka iyo Caruurta (MuKi-Turnen, VaKi-Turnen oder ElKi-Turnen) Waxaa loogu talagalay waalidiinta haysto caruurta yaryar. Waad isla ciyaari kartaan, waad iskula dhex ordi kartaan, waadna kuwada baashaali kartaan. Degmooyinka (Gemeinde) intooda badan waalaga helaa fursadahaan.
- Bar kulanka Xaafadaha (Quartiertreffpunkte) waxay hayaan barnaamijyo kala duwan oo loogu talagalay Waalidiinta iyo Ilmahooda.
- Maktabadaha buugaagta (Bibliotheken) iyo Maktabadaha alaabaha lagu ciyaarsiyo ilmaha (Ludotheken) waxay hayaan sidoo kale adeegyo loogu talagalay Caruurta yaryar iyo kuwa waaweyn.

## Waxbarashada Waalidka

Basel-Stadt waxaa ka jira koorsooyin waalidiinta wax lagu baraayo, mowduucyo badan oo kala duwana ku saabsan. Sidoo kale waxaa jiro koorsoyin u gaar ah ajaanibta. Tusaale ahaan waxaa jiro Koorsoyin lagu baraayo waalidiinta nidaamka waxbarashada ee wadankan Swiiserlaan. Koorsoyinka qaar oo waxaa la helaa iyagoo ku baxa luuqado kale.

## Talooyinka Barbaarinta Ubadka

Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan barbaarinta ilmahaaga, waxaa jiro xarumo badan oo ku caawinaayo.
Tusaale ahaan, haddii ay kuu joogaan caruur aad u yar ama caruur ilaa 5 sano jir ah, waxaad u tagi kartaa lataliyaasha waalidiinta (Elternberatung).
Su'aalo degdeg ah haddii aad qabto waxaa jiro Taleefoon aad waci karto habeen iyo maalin. Khabiiro ayaa diyaar kuu ah oo kula talin doono. Haddii aad wacdo waxaad bixin doontaa qiimaha wicitaanka caadiga ah ee taleefanka guriga.
Kawac Talefon lambarka: 0848 35 45 55. Ama u qor i-Meeyl. Cinwaanka waxaad kaheli kartaa boggaan www.elternnotruf.ch.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/partnerschaft-und-kinder/eltern-sein

# Xanaanada Caruurta

Waalidiin badan ayaa marka ilmaha u dhashaan kadib sii shaqeyo. Gobolkan Basel-Stadt waxaa jiro adeegyo gaar ah oo ilmaha lagu daryeelo. Inta badan adeegyadan ma ahan kuwa bilaash ah.

## Goobaha Ubadka lagu haayo (Kita)

Xanaanada Maalin jooga ah waxaa laguu haynayaa ilmahaaga maalinka dhan. Waxa loo yaqaanaa Kindertagesstätte, marka lasoo gaabiyana "Kita". Waxaa lagu haayaa halkan inta badan caruurta kaweyn 3 bilood ilaa iyo da'da iskuulka.. Waxaa jiro laakin "Kitas" lagu haayo ilmaha iskuullada dhigto, waqtiga qadada, iskuulka kahor iyo kadib.
Waxaa muhiim ah inaad ilmahaaga waqti hore sii diiwaangeliso, sababtoo ah safka sugitaanka oo aad u dheer. Qiimaha xanaanada waa kuwo kala qaalisan. Maamullada degmooyinka qaar ayaa qeyb kamid ah kharashaadka ka bixiyo waalidiinta. Waad weydiin kartaa xafiiska degmada qiimaha xanaanada iyo sidii aad u diiwaangelin lahayd ilmahaada.

## Goobaha Caruurta lagu ciyaarsiiyo

Caruur badan ayaa inta aysan bilaabin Iskuullada waxaa la geeyaa Goobaha lagu ciyaarsiiyo (Spielgruppe). Caruurta ka wayn da'da 3-da sano ayaa ku kulmo goobahaan iyagoo lasocon waalidiintood. Khabiiro ku takhasusay daryeelka Ubadka ayaa caruurta halkaas ku mashquuliyo. Tusaale ahaan, ilmaha waxay halkaas ku xardhaan sawir gacmeedyo ama wey wada ciyaaraan. Goobahan in lageeyo ilmaha waalid ayaa xor u ah.
Haddii ilmahaaga yar uu guriga af jarmal ku hadlin, goobahaas ayaa lagayn karaa si uu barashada luqadda u bilaabo. Taasi waxay u fududeynaysaa marka ilmaha ay bilaabaan iskuulka.

## Nolol maalmeed / Miiska Qadada

Dugsiyada hoose iyo dhexe dhammaantood waxay leeyihiin nolol maalmeedyo (Tagesstrukturen) gudaha iskuulka iyo meelaha ku hareeysan ah. Tagesstruktur waxaa laga wadaa, In ilmaha ay joogaan waqtiga qadada iskuulka oo halkaas lagu qado siiyo. Iskuulka markuu dhammaado kaddibna ay helaan qof la joogo iyagana ay halkaas layligooda kaga shaqeeyn karaan.
Ma doonaysaa in Carruutaada ay booqdaan Adeegyada noocan ah? Hadaba ma ahan mid bilaash ah. Qiimaha lacagta lagaa doonayo waxay ku xirantahay inta mushahar ahaan kuusoo gasho. Ubadkaada waxaad u diri kartaa goobahaas 1 maalin ama maalmo badan usbuuciiba.

## Qoys Maalmeedka

Waxaad carruurtaada u geysan kartaa sidoo kale qoys maalinka oo dhan kuu haayo. Qoys Maalmeedka (Tagesfamilie), waa qoys ilmahaaga kuu haynaayo maalinka dhan ama iskuulka kahor iyo kadib. Xarumaha howlahaas ka shaqada leh ayaa kaa caawinayo sidaad u heli lahayd reer kugu habboon. Sidoo kale waxay kula wadaagi doonaan caadi ahaan qiimaha la iska qaado.

## Ubad hayaha / Xaaladaha Adag

Wadankan Swiiserlaan dhallinyarada waxay ka shaqayn karaan inay haayaan ilmaha fiidka hore ama maalmaha sabtiga iyo axadda. Dhalinyarada waxey ku qaataan howlahaan lacag. Hay'adda laanqayrta cas ee Basel-Stadt "Schweizerische Rote Kreuz Basel-Stadt (SRK)" ayaad ka helaysaa liiska xarumaha ku shaqada leh howlahaas iyo waliba howlwadeenno horay usoo bartay qaabka ilmaha loo haayo.
Xanaanada ilmaha marka xaalad degdeg ah jirto:
Waxaa macquul ah inay kula soo deristo xaalad degdeg ah oo aad u baahato qof ilmaha yar kuu sii haayo. Tusaale ahaan, adiga iyo lamaanahaada ayaa ku qasbanaaday inaad isbitaalka aadiin, ilmahii yaraana cid aad uga tagtaan ma jirto. Hay'adda laanqayrta cas ee Basel-Stadt (SRK) waxay kuu haysaa Xanaanada ilmaha xilliga xaaladaha kugu adagyihiin. Adeegaan ma ahan mid bilaash ah, laakin qaar kamid ah Shirkadaha Caymiska Caafimaadka ayaa qarashaadkaas dusha saarto.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/partnerschaft-und-kinder/kinderbetreuung

# Soo raridda Reerka

Marka aad ku nooshahay wadankan Swiiserlaan, waxaad u dacwoon kartaa si laguugu keeno qaar kamid ah ehelkaada, laakin waa inaad shuruudo cayyiman soo buuxiso. Qaraabadaada ama dad aad istaqaanaan haddii ay doonayaan inay wadankaan kugu soo booqdaan, waxaa macquul ah in looga baahdo dalku galka Swiiserlaan. Taasna waxay ku xirantahay hadba waddanka ay kaaso booqanayaan.

## Soo raridda Reerka

Marka aad halkan ku nooshahay, waxaa macquul gal ah in laguu ogolaado in ehelkaada kuu dhow ama xaaskaada halkan kula soo degaan (Familiennachzug). Xubnaha qoyskaada ee aad u dacwoon karto, waxay ku xirantahay sharciga aad waddankaan ku joogto iyo waddanka aad u dhalatay. Waa macquul Haddii aad tahay qof si kumel gaar ah loo qaabilay oo haysto sharciga F in laguu ogolado in reerkaga kula soo degaan halkan.
Xafiiska ajaanibta ee (Migrationsamt) ayaa leh go'aanka ah in reerkaaga halkan kugula noolaan karaan. Xafiiska ayaa kula socodsiinaya waxii aad samayn lahayd iyo waraaqadaha lagaa doonaayo inaad keento.
Fiiro Gaar ah:
Waa inaad codsiga dacwada reerkaaga ku gudbisato muddo cayyiman gudahood. Muddada dalabka dacwada caruurtaada way kayartahay midda dadka waaweeyn, tusaale ahaan Xaaskaada.

## Diyaarinta Guurka

Maku nooshahay Swiiserlaan mise doonaysaa inaad is guursataan qof ku nool wadan kale? Hadaba waxaad codsan kartaa in laguu ogolaado inuu qofkaas dalka soo gali karo si aad u diyaarisaan aqal galkiina (Vorbereitung der Heirat). Sidaas ayaa lamaanahaga kuugu imaan karaa guurka kahor kadibna arooskiina uu ka dhici karaa halkan.
Hay'adda Socdaalka iyo ajaanibta (Migrationsamt) ayaa go'aanka iska leh in uu lamaanahaaga imaan karo halkan. Hay'adda waxay kula socodsiinaysaa shuruudaha laga doonayo inaad buuxiso iyo waraaqaha aad u baahantahay.

## Fiisaha Dalku Galka

Qaraabadaada ama dad aad taqaan miyaa doonaya inay kaasoo booqdaan waddankii aad katimid oo kugu soo booqdaan wadankan Swiiserlaan? Hadaba waxay u baahanyihiin Fiiso ay kusoo galaan wadankan Swiiserlaan. Inta badan ma ahan mid sahlan sida lagu helo. Waxaa loo baahnaan karaa marmar Warqad casuumad ah oo adiga aad qortay ama waa in Dadka kusoo booqanaya ay damaanad qaadaan inay dhaqaalo ahaan isku filanyihiin (Verpflichtungserklärung).
Safaaradda Swiiserlaan kuleedahay dibadda ayaa go'aanka iska leh dadka ay siinayso Fiisaha. Safaarada waxay kula wadaagi doontaa waxyaabaha looga baahanyahay martidaada inay sameeyaan ama warqadaha ay u baahanyihiin. Waxaa sidoo kale aad kaheli kartaa warbixinadaas Hay'adda socdaalka (Migrationsamt).

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/partnerschaft-und-kinder/familiennachzug

# Khilaafyada

Khilaaf iyo muran miyaa ka dhex taagan Lamaanahaada ama Reerkaada? Hadaba waxaa ku caawinayo xarumo latalin oo kala duwan. Rabshadaha qoyska ee u dhaxeeya lamaanaha waa mamnuuc. Boggeena "Hallo Basel-Stadt" waxaa jiro qeyb dhan oo aan kaga hadlayno Rabshadaha Qoyska. Halkaas ayaad ka helaysaa macluumad dheeraad ah oo ku saabsan qodobkaan.

## Khilaafyada Lammaanaha

Haddii aad dhib ku qabto lammaanahada, waxaad caawimaad ka heli kartaa khabiirada talada siiya reeraha is qaba (Eheberatung). Waxaa jiro xarumo talo bixin oo gaar u ah arrimahaas kulana raadin doono xal. Inta badan kulanka koowaad waa bilaash ama waxaad iska bixinaysaa lacag yar.

## Khilaafka Qoyska

Marka ay Caruur kuu joogto marmar waxaa dhici karto xaalado adag inay idin dhex maraan. Ilmaha iyo waalidkaba culeys ayay ku noqon kartaa arinkan. Wax aad sameyso hadii aad garan weyso waxaa fiican inaad raadsato caawimaad.
Caawinta Waalidka:

- Xarunta latalinta qoyska (Familienberatungsstelle) waxaad ka helaysaa latalin gaar ah.
- Hadii aad qabto su'aalo kusaabsan barbaarinta ubadka ama aad ka walwalsantahay ilmahaada, waxaad wici kartaa lambarka xaaladaha degdega ah ee waalidka "Elternnotruf". Halkaan waxaad ka helaysaa latalin ay diyaar kuula yihiin khabiiro. Waxaad wici kartaa Lambarka Telefoonka 0848 35 45 55 (Waxaad bixinaysaa qiimaha caadiga ah ee Telefonka guriga) ama waxaad u qori kartaa I-meeyl.

Caawinta dhalinyarada iyo Carruurta:

- Dhalinyarada iyo Carruurta waxay wici karaan lambarka xaaladaha degdega ah "Kindernotruf", ama waxay diri karaan ama kula sheekeysan karaan I-meeyl ama fariin qoraal. Lambarka Telefoonka waa: 147 (wicitaanka lambarkaan waa bilaash).

## Rabshadaha Qoyska

Rabshadaha Qoyska ka dhex dhaco waa dambi cad waana mamnuuc. Qofkii Xoog adeegsado waxuu noqonayaa dambiile. Qaab walbo oo xoog la isu maquunsado waa mamnuuc. Qofna xoog uma adeegsan karo Qoyskiisa: ha noqoto Ninka ama Xaaskiisa, Waalidka iyo caruurta. Hadii ay Dowladu ka warhesho arrimaha noocan oo kale ah waa in ay tallaabo ka qaado.
Mala dhibantahay rabshadaha Qoyska? Waxaa jiro adeegyo ku caawin kara.
Adeegyadan waa kuwa bilaash iyo qarsoodi ah.

- Guriga Haweenka / Guriga Aabeyaasha (Frauenhaus / Väterhaus): Marka Dumarka ama Ragga ay Rabshado kala kulmaan guryahooda, waxay intii muddo ah joogi karaan, Guriga Haweenka "Frauenhaus" ama Guriga Aabeyaasha "Väterhaus". Caruurtooda ayay horay usoo kaxaysan karaan si ay u helaan gabbaad. Haweenka waxay wici karaan habeen iyo maalin guriga Haweenka. Lambarka Taleefankana waa: 061 681 66 33.
- Lambarka xaaladaha degdega ah ee Caruurta (Kindernotruf): Caruurta iyo dhalinyarada waxay wici karaan lambarka caawimaada laga helo. Wicitaanka lambarkan waa bilaash. Lambarka waa: 147.
- Halis ma ugu jirtaa qof ka mid ah Qoyskaada? Waxaad wacdaa lambarka booliiska. Lambarka Telefonka waa: 117. Booliska waxuu ka mamnuuci karaa dhagarqabahaas guriga oo dhan. Dhagar qabaha markaas waxii ka dambeeyo sooma gali karo guriga.

Boggeena "Hallo Basel-Stadt" waxaa jiro qeyb dhan oo aan kaga hadlayno Rabshadaha Qoyska. Halkaas ayaad ka helaysaa macluumad dheeraad ah oo ku saabsan qodobkaan.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/partnerschaft-und-kinder/konflikte